

67. Se l'atto contiene più convenzioni distinte, sono dovuti tanti onorari quante sono le convenzioni.

Quando l'atto comprenda più disposizioni necessariamente connesse e derivanti per intrinseca loro natura le une dalle altre, sarà considerato come se comprendesse la sola disposizione che dà luogo all'onorario più favorevole al notaio, se pure essa possa considerarsi come accessoria alle altre.

68. Quando l'atto sia nullo per causa imputabile al notaio, o la spedizione della copia, dell'estratto e del certificato non faccia fede per essere irregolare, non sarà dovuto alcun onorario, diritto e rimborso di spese.

Negli accennati casi, oltre il risarcimento dei danni a norma di legge, il notaio deve rimborsare le parti delle somme che gli fossero state pagate.

69. Salvo quanto è disposto dall'art. 27 per le persone ammesse al gratuito patrocinio, le parti sono tenute in solido verso il notaio tanto al pagamento degli onorari e diritti accessori quanto al rimborso delle spese.

Il notaio può rifiutarsi verso chiunque alla spedizione delle copie, degli estratti e dei certificati, finché l'accennato pagamento o rimborso non sia interamente eseguito, ovvero, nel caso di contestazione, depositato fino alla definizione della controversia, presso il Consiglio notarile.

Appendice 12

SHARCI L. 85 Tr. 21 Oktoobar 1975.

Sharci ku saabsan Qareennada (1).

QAYBTA 1aad QODOBBO GUUD

1. *Dhismaha Iskaashatada Qareennada.* — 1) Qareennada Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliya oo dhan waxaa laysugu geeynayaa Iskaashata Qareenneed sida lagu sheegay lifaaqa la socda Sharcigan (annex).

2) Ujeeddada weyn ee laga leeyahay Iskaashatada waxa weeye in la nidaamiyo hawsha Qareennada ayadoo la ilaalinayo danta dadweynaha Soomaaliyed.

3) Xarunta dhexe ee Iskaashatada Qareennada waxa laga dhisayaa Xamar, waxaa lagu dhisayaa Dekreeto u soo saaro Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta. Iskaashatadu waa inney ka dhisto Gobollada iyo Degmooyinka Dalka Laamo markii loo baahdo.

4) Iskaashatada Qareennada waxay yeelanaysaa shakhsivad sharciveed (Juridical Personality) marka laga billaabo taariikhda rasmi ahaan loo dhiso.

2. *Tirtiridda shaqada Wakiillada.* — 1) Marka laga billaabo taariikhda uu sharcigan dhaqan galo dadka keliya ee Maxkamadaha wax ka daafici kara ama qaban kara shaqada Qareennimada waxaa weeye Qareennada (Advocates).

2) "Wakiilada" oo hadda ka hor Maxkamadaha wax ka daafici jiray waa laga reebay shaqada Qareennimada.

(1) Faafinta Rasmiga (B.U.) L. 2 R. 12 ee 15 Diisembar, 1975.

3) Diiwaanka (Albo) ku saabsan "Wakiillada" ee hadda jira waa la baabi'iyey.

3. *Hawsha Qareennimada.* — 1) Qareennada Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed wa iney si xilkasnimo ku jirto u gutaan hawshooda oo ah daaficidda dadka Maxkamadaha hortooda ayagoo ilaalinaya danta iyo xuquuqda dadka ay daafacayaan. Qareennada waxay gacan ka geysanayaan xoojinta hantiwadaageynta sharciyada Dalka iyo sare u qaadka garaadka dadweynaha xagga sharciyada.

2) Qareennada waxaa wajib gaar ah ka saaran yahay:

a) iney dadka ka daafacaan Maxkamadaha;

b) iney gacan ka geystaan sidii runta looga gaari lahaa dacwadaha dembiyada ayagoo Maxkamadaha hor dhigaya wax allaale wixii khafiifin kara culeyska dembiga ee deysanaha;

t) iney dadweynaha ka daafacaan Maxkamadaha wixii dacwooyin ah ee ku saabsan madani, Qoyska, shaqada iyo idaarigaba, gacanna ka geystaan caddeynta dacwadaha iyo haddii ey suurtoobi karto heshiis ka dhexdhalayaan dhinacyada is-dacweynaya;

j) iney siiyaan talo sharciyed dadka iyo hey'adaha ey daafacayaan, kana caawiyaan si ey u ilaalin lahaayeen xuquuqdooda iyo danahooda ayagoo u fasiraya sharciga.

4. *Kormeerid iyo hanuunin.* — 1) Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta ayadoo la kaashaneysa Xafiiska Siyaasadda ee M.G.S.K. waxay Iskaashatada siineysaa Tusaalooyin xirfadeed iyo siyaasaddaba si loo hormariyo Iskaashatada.

2) Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta wuxuu bixin karaa tilmaamooyin iyo amarro ku saabsan hawsha Iskaashatada markey ugu muuqato danta guud ee Qaranka.

5. *Guddiga talabixinta iyo Diwaan gelinta.* — 1) Waxaa la dhisayaa Guddiga Talabixinta iyo Diwaan gelinta Qareennada oo ka kooban:

a) Guddoomiyaha Maxkamadda Sare — Guddoomiye

b) Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka — Xubin

t) Garyaqaanka Guud ee Dawladda — Xubin

j) Agaasimaha Waaxda Xirfadda iyo Garsoorka ee Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta — Xubin

x) Guddoomiyaha Iskaashatada — Xubin

2) Guddiga kor lagu sheegay waxaa loo xilsaaray inuu diiwaan geliyo qareennadii la yimaada shuruudda lagu tilmaamay qodobka soo socda.

3) Guddigu wuxuu awood u leeyahay inuu u gudbiyo Xoghayaha Dawladda warbixin iyo talo ku saabsan hawlaha Iskaashatada.

QAYBTA 2aad

GELITAANKA QAREENNIMADA

6. *Dadka noqon kara Qareenno.* — 1) Qofka doonayaa inuu noqdo Qareen waa inuu u soo qortaa arji Guddiga Talabixinta iyo Diiwaangelinta Qareennada ee Maxkamadda Sare, waana inuu leeyahay shuruuddaha hoos ku qoran:

a) waa inuu yahay qof Soomaali ah oo leh asluub wanaagsan;

b) waa inuu yahay qof waafaqsan Mabaadii'da Kacaanka;

t) waa inuu yahay qof da'diisu gaartay 21 sano;

j) waa inuu haystaa shahaadada sharciga ee jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed ama jaamacad ama machad ajnabi ah oo sidaan loo aqoonsan yahay;

x) waa inuu yahay qof ku guuleystey imtixaanka ay qaban qaabiso Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta;

kh) waa inuu yahay qof Qareen ka soo qaatay tababar muddo aan yareyn 6 bilood;

d) waa inuu ahaadaa qof aan lagu xukumin dembi ciqaabtiisu ka badan tahay seddex sano.

2) Dadka Soomaaliyeed ee horey u ahaan jirey Garsoorayaal ama Qareennimo ugu shaqey jirey Hay'adaha Dawladda ugu yaraan laba sano, haystana shahaadada sharciga ee lagu sheegay xarafka 1) *j)* ee qodobkan, waa laga dhaafayaa imtixaanka lagu sheegay xarafka 1) *x)* ee qodobkan.

7. *Diiwaanka Qareennada (Albo).* — 1) Diiwaanka Qareennada waxaa lagu keydineyaa Maxkamadda Sare. Maamulka Diiwaanka Qareennada iyo habeyntiisa waxaa iska leh Guddiga Talabixinta ee lagu tilmaamay qodobka 5aad ee Sharcigan.

2) Qareen waliba oo loo ogolaaday Qareenimada waxaa lagu qorayaa Diiwanka Qareennada.

3) Qof kasta oo loo oggolaado inuu Qareen noqdo wuxuu Guddiga Talabixinta iyo Diiwaangelinta siineyaa shahado caddeyneysa qorrirtaankaas.

8. *Gelitaanka Iskaashataga Qareennada.* — 1) Qofka ka soo basca shuruudaha ku qoran Qod. 6aad ee Sharcigan, rabana inuu Qareennimo ku shaqeysto waa inuu arji u qorta Guddiga Maamulka Iskaashatada Qareennada, si uu xubing uga noqdo.

9. *Xaqa Qareennimada.* — Qareen kasta oo magaciisa lagu qoray Diiwaanka Qareennada, kana mid ah Iskaashatada wuxuu xaq u leeyahay inuu Maxkamadaha wax ka daafaco iyo inuu fuliyo hawlaha lagu soo sheegay Qood. 3aad ee Sharcigan.

10. *Qareennada dalalka qalaad.* — Qareennada dalalka qalaad way ka daafici karaan Maxkamadaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya haddii marka hore uu u ogolaado Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta ayadoo ay taa ku xiran tahay in dawladahooda asalka ah ay sida oo kale u ogol yihiin Qareennada Soomaaliyeed.

QAYBTA 3aad

DACWAD ASLUUBEED

11. *Dacwad Asluubeed.* — Tallaabooyin asluubeed ayaa lagu qaadi karaa Qareenka ka soo bixi waaya hawsha lagu sheegay Qod. 3aad ee Sharcigan, gaar ahaanna:

a) haddii u faafiyo war ku saabsan dacwadda u ka helay qofka u daafacayo oo dhibaato u keeneyso danta qofka u daafacayo oo aan ku jirin wararka ku saabsan nabadgelyada iyo midnimadda Qaranka;

b) haddii abaalgud hawleed ka qaato qof aan ahayn qofkii uu daafacayey;

t) haddii uu u soo qaado si toosan ama si dadban, ama isku dayo inuu u soo qaado laaluush qof ka shaqeeya ama ku lug leh maamulka caddaaladda;

j) haddii uu amar ku saabsan dacwadda ka qaato qof aan ahayn kii uu daafacayey ama wakiilkiisa;

x) haddii uu daafaciisa ku dhiso sharci dhawrid la'aan ama khiyaamo;

kh) haddii uu qaato lacag ka badan xushmadii loo gooyay;

QAYBTA 4aad

XUSHMADDA IYO MAGACAABIDDA QAREENKA

16. *Xushmadda*. — 1) Xushmadda la bixinayo waa tan lagu caddeeyey warqado tilmaamooyinka ku lifaaqan sharcigan.

2) Xushmadda Qareenka waxaa lagu shubayaa xisaabta Iskaashatada ama caddaan ahaan ayaa loogu dhiibi karaa xisaabiyaha Iskaashatada.

3) Xushmadda lagu sheegay Sharcigan kuma jiraan kharajka safarka, tigidhada iyo warqadaha tigidhada leh (marche da bollo, carte bollate) iyo kharajka kale ee Maxkamadda ay saarto dhinacyada is-dacweynaya.

4) Markay jiraan sababo aan caadi ahayn Maxkamadda waxay xushmadda Qareenka ku kordhin kartaa 1/3 inta ugu badan.

17. *Magacaabidda Qareenka* ⁽¹⁾. — Qofka magacaabanaya Qareen waa inuu ku caddeeyaa qoriin Maxkamadda ama Maxkamadaha uu u magacaabanaya Qareenka, nooca ay tahay dacwaddiisa iyo ilaa iyo inta u daafacayo. Qoriinkaas waa inuu u geeyaa Iskaashatada.

18. *Dulsaaridda xushmadda Qareenka*. — 1) Xushmadda la bixiyey waxaa la dul saarayaa dhinaca dacwadda lagu xukumo.

2) Hase yeeshee marka ay daafacaan dhinac hal qareen wax ka badani Maxkamaddu waa inay xukunta xushmadda hal Qareen oo keliya.

3) Haddii dacwad lagu dhammeeyo heshiis xushmadda la bixinayo waa xushmadda Maxkamadda ay ku dhammaato dacwaddaas oo ah inta ay dhigayaan warqaddo tilmaamooyinka ku lifaaqan sharcigan.

19. *Soo celinta xushmadda*. — 1) Haddii Qareen dacwad ka baxo sabab la' aan, Iskaashatada waa iney u celisaa xushmadda qofkii horey u bixiyey iyo magdhow haddii ay khasaaro ka soo gaaray, Iskaashatada lacagtaas waxay ka goosanaysaa xisaabta Qareenkaas.

2) Sida iyo si le'eg haddii qofka la daafacayey uu rabo inuu Qareen kale magacawdo inta aan dacwaddu dhammaan xushmadda la bixinayo waa xushmadda ku saabsan Maxkamadda dacwadda ka soconeysey oo dhan sida ay dhigayaan warqado tilmaamooyinka ku lifaaqan Sharcigan.

QAYBTA 5aad

QODOBBO UGU DAMBEYS AH

20. *Ciqaab*. — Qof kasta oo ku shaqeysta Qareennimo Maxkamaad horteed isagoo aan xaq u lahayn sida Sharcigani u dhigayo waxaa lagu ciqaabayaa ganaax ilaa Sh.So. 5.000 ama xarig ilaa hal sano ah.

(1) Dacwadaha Dawladdu dhinac ka tahay waxa qura oo daafici kara Garyaqaanka Guud ee Dawladda oo loo xilsaaray inuu ilaaliyo danta Dawladda. Lama oggola, hadda wixii ka dambeeya in cid kale daafacdo ama Maxkamadda horteeda uga doodo Wasaaradaha, Wakaaladaha, Xubnaha kale ee Dawladda, iyo Shirka-daha iyo Mashaariicda Dowladda Soomaaliya qaibta ku leedahay (eeg qod. 3aad ee Sharciga L. 14 Tr. 4 Febraayo 1975 — F.R. L. 1 R. 2 bis ee 14 Febraayo 1975).

Advocates Law 1975 (Art. 1 to 16 REPEALED in 1986)

21. *Qareennada hadda ku qoran Diiwaanka jira.* — 1) Qareennada ku qoran Diiwaanka yaala Maxkamadda Sare oo Qareennimo ku shaqeysta waxa sharcigan loogu aqoonsanayaa inay Qareennimo ku shaqeyn karaan ilaa muddo hal ah oo laga bilaabo maalinta uu dhaqan galo sharcigan.

2) Bishaas ka dib marka uu sharcigan dhaqan galo, ma jiro qof loo ogolaanayo inuu Qareennimo ku shaqeysto haddii usan ka mid noqon Iskaashatada Qareennada.

3) Dadka ku qoran Diiwaannada Qareennada ee hadda jira oo aan Qareennimo ku shaqeysan waxaa lagu qorayaa Diiwaanka cusub ee lagu sameeynayo sharcigan. Marka ay rabaan inay Qareennimo ku shaqeystaan waa inay galaan Iskaashatada Qareennada.

4) Labada Diiwaan ee Qareennimo oo hadda jira waa la mideeyey dadka ku qoranna waxaa lagu qorayaa Diiwaan cusub, markii la hubsado iney waafaqsan yihiin sharcigan.

22. *U beddelka Iskaashatada Garsoorayaal iyo Kaaliyayaal.* — 1) Ayadoo la daryelayo Iskaashatada danteeda, Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Garsoorka' iyo Arrimaha Diinta wuxuu awood u leeyahay inuu si ku meel gaar ah ugu beddelo Iskaashatada Qareennada, Garsoorayaal iyo shaqaale kale.

Garsoorayaashaa waxay muddadaas ku shaqeynayaan Qareennimo, waxayna Iskaashatada ka kaalmeenayaan maamulka iyo nidaaminta hawsheeda, ayagoo mushaarkooda iyo xuquuqdooda kale qaadanaya Wasaaradda.

23. *Xiriirka Iskaashatada, Wakaaladaha iyo Hey'adaha Dawladda ee kale.* — Iskaashatada Qareennada waxay xiriir la yeelan kartaa xagga sharciga Wakaaladaha Madax bannaan, Hey'adaha iyo Laamaha kale ee Dawladda.

24. *Xeer Nidaamiye Dawladeed.* — Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta wuxuu awood u leeyahay inuu soo saaro Xeer Nidaamiye Dawladeed oo lagu fasirayo laguna fulinayo sharcigan.

25. *Tirtirid.* — 1) Sharciyada hoos ku qoran waa la tirtiray.

a) sharci 1. 7 ee soo baxay 27-6-1958.

b) sharciga Qareennimada ee soo baxay 1957 ee ka socda Gobolada Waqooyi.

2) Sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon kareyn sharcigan.

26. *Dhaqan gelid.* — 1) Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 21-10-1975.

2) Waana in lagu soo saaraa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.